

## Shaqaalaha Halista Badan Ugu Jira ama Wajahaya Alkohoolka Aysoborobayl (IPA) ee ku jirta Jeermis-dilayaasha

**Fiiro Gaar ah:** Ganacsiyada ay joogaan shaqaalaha adeegsada tirtirayaasha ama masaxyada ama milannada Alkohoolka Aysoborobayl/Isopropyl Alcohol (IPA) si ay ugu nadiifiyaan ama jeermiska ugaga dillaan goobaha shaqada. IPA waa dareere aan midab lahayn oo sidoo kale loo yaqaanno alkohoolka wax lagu tirtiro.

### Wajahidda Khatarta ah

Shaqaalaha ayaa dhowaan waxay ku wajaheen heerarka khatarta suuragalka ah ee IPA oo ku jirta hawada oo laba goobo shaqo oo kala duwan oo ku yaalla gobolka Washington.

- Tirtirayaal ama msaxyo horey ugu dhergay IPA (70% IPA) ayaa lagu adeegsaday hal goob shaqo
- “Alkohoolka wax lagu tirtiro ama la mariyo” ee sida caadiga ah la isaga soo gato ee aan u baahnayn warqad dhakhtar (milanka 70% IPA) iyo tirtirayaasha ama masaxyada horey ugu dhergay alkohoolka (55% IPA) ayaa lagu adeegsaday goobta kale.

Hawo-siinta labada gooboodba way liidatay waxaanna dhowr shaqaale ka soo gaarey alkohoolka IPA ee hawada oo ah heerar ka sarreeya xadka wajahidda muddada gaaban ee 15-daqiiqo.

### IPA ayaa khatar ku noqon karta Caafimaadka iyo Bedqabka Shaqaalaha

Uumiga alkohoolka IPA ee hawada ayaa keeni kara:

- Cuncunka cunaha, sanko iyo indhaha shaqaalaha.
- Dawakhaad, madax-xanuun, isuduwid lumin, iyo sida suuragalka ah miyirbeel.

Halista Bedqabka: Uumiga IPA ayaa isugu soo urursami kara hawada waxayna si fudud u hurin karaan (Alkohoolka IPA waa Dabaqadda 3aad ee dareeraha guban-og) dab.

### Taxaddarada Bedqabka

Isticmaalka kooban ee badeecooyinka IPA, ee mararka qaar ah (tusaale, ku masaxidda telefoonka gacanta ama miiska) caadi ahaan ma ahan wax laga walaaco, balse hawlaha wax ku masaxidda ama buufiska jooqta ah ee lagu buufiyo qol ama meel xiran ayaa abuureysa halista wajahidda heerka sare.

Taxaddaradan soo socda ayaa loo-shaqeeyayaasha ku caawin kara yareynta halista ay wajahayaan shaqaalaha adeegsada IPA:



Isticmaalka jooqta ah ee badeecooyinka ay ku jirto alkohoolka aysoborobayl(isopropanol) ayaa ku sii-deyn karta uumi ku filan hawada oo halis ku ah shaqaalaha adeegsanaya xilliga hawlaha jeermis-dilidda.

- **Aasaas** Barnaamijka War-iswaarsiinta Khatarta oo qoraal ah kaasi oo wax looga qabanayo:
  - Xaashiyada Xogta Bedqabka ee loogu talagalay dhammaan milannada iyo badeecooyinka ay ku jirto alkohoolka IPA.
  - Tababarka shaqaalaha ee ku saabsan saameynta caafimaadka iyo khatarraha bedqabka ee alkohoolka IPA.
  - Habraacyada calaamadeynta, kaydinta, iyo ka takhalusidda dhammaan badeecooyinka ay ku jirto alkohoolka IPA.
  - Habraacyada bedqabka ee xaaladda degdegga ah ee loogu talagalay daadashada iyo/ama firdhadka, dabka, iyo saameynta caafimaadka.
- **Cabbir** halista ay shakhsi ahaan wajahayaan shaqaalaha si loo hubiyo in ay ka hooseeyaan xadka lagu maareeyo: 400 ppm in ka badan muddo 8-saacadood ah iyo 500 ppm in ka badan muddo 15-daqiiqo ah kasta. Natiijooyinka ayaa gacan kaa siinaya go'aaminta haddii kantorooladu ay lagama maarmaan yihiin. Ku celi cabbiraadaha mar kastoo uu dhaco isbeddel ku yimaada badeecooyinka, hab-dhaqannada shaqada, ama isbeddelo kale oo saameyn kara halista ay wajahayaan shaqaalaha.



■ **Kantorool** uumiga IPA:

- Isticmaal hawo-siin dabiici ah ama mid aalad la xiriira oo bixinaya hawo cusub oo ku filan halka IPA lagu isticmaalo. Haddii bixinta hawo cusub aysan macquul ahayn, isticmaal nidaam hawada ka ciribtiraya ama baabi'inaya uumiga IPA.
- Ku isticmaal IPA goobaha leh hawo-siin wanaagsan (tusaale, hagooga ama daboolka sheybaarka ama xayndaabka kale ee leh nidaam hawo-siin shaqeynaya oo ku habboon) ama meel u dhow nidaamka yareynaya halista wasakhda hawada ee uu wajahayo shaqalaha (LEV).
- Hubso in si joogto ah loo dayactiro nidaamyada hawo-siinta aaladda la xiriira iyo in si joogto ah loo eego si loo xaqiijiyo in ay shaqeynayaan.

■ **Tababar** shaqaalaha:

- Sida loo aqoonsado saameynta khatarta leh ee IPA.
- In ay si dhakhso leh u raadsadaan hawo cusub haddii ay dareemaan dawakhaad ama ay la kulmaan astaamaha lagu garto in ay khatar sare ku soo wajahan tahay.
- In aysan isku darin IPA iyo kiimikooyinka kale. In aysan marnaba IPA ku darin warankiilo. Waxaa ka soo baxaya gaaska koloriini oo guba indhaha, cunaha, waxaanna laga yaabaa in uu dhibaato u geysto sambabada.
- Sida habboon ee loo baraxo loona adeegsado IPA. Milannada 70% IPA ee lagu darey biyo waa in sagxadaha lagu dhaafu muddo 30 ilbiriqsi ah si loo xaqiijiyo jeermis-dilidda. IPA (100%) saafiga ah ayaa si dhakhso leh ugu uumi-baxaysa isticmaalkaasi waxaanna yar waxtarkeeda.
- In sagxadaha lagu nadiifiyo saabuun iyo biyo ka hor inta aan lagu nadiifin IPA.

- In si amaan ah loogu rido masaxyada IPA ama agabka dheregsan weel si adag u xiran oo yaalla meel qabow, hawo wanaagsan leh oo ka fog iftiinka qorraxda iyo ilaha kale ee kuleylka. Ha ugu tagin meelaha bannaan ama qashinka. Waxay sii wadi doonaan siideynta uumiga IPA.

■ **Bixi** qalabka bedqabka:

- Muraayadaha indhaha ama gaashaanka wejiga ayaa indhaha ka dhowrsi ama ilaalin doonna uumiga IPA iyo firdhadka; gacmo-gashiyadana waxay ka ilaalin doonnaan taabashada maqaarka.
- Qalab neefsasho oo habboon marka hawo-siinta ama kantoroolada kale aysan ku xaddidi karin wajahidda khatarta IPA gudaha xadka la maareeyo. Raac shuruudaha Barnaamijka Ilaalinta Neefsashada oo ay ku jiraan hubinta in shaqaalaha caafimaad ahaan la qiimeeyo iyo in ay ku habboon yihiin in laga baaro isticmaalka qalabka neefsashada iyo in loo tababarey isticmaalka habboon iyo dayactirka.
- Tas-hiilaadyada indho-dhaqa xaaladaha degdegga ah oo bixiya ugu yaraan 0.4 gallaan (ama 1.5 litir) daqiiqadii oo ah biyo diirran oo si tartiib ah u socda muddo 15 daqiiqo ah marka la adeegsanayo IPA dareere ah. Qaybaha la qaadan karo waxaa loo baahan doonnaa in ay qaadaan ugu yaraan lix gallaan (ama 22.5 litir) si ay uga soo baxaan shuruudahay sahayda ugu yar.

■ **Ku dheji** astaamaha digniinta hareeraha qalabka iyo/ ama albaabaha laga galo meelaha wajahidda khatarta ay ka dhici karto kuwaas oo fara shaqaalaha in aysan gelin iyagga oo aanan xirnayn qalabka ilaalinta shakhsiga.

## Kheyraadyada kale ee aad heli karto

Bogga Aasaasiyaadka Bedqabka Kiimikada:  
[www.Lni.wa.gov/ChemicalSafety](http://www.Lni.wa.gov/ChemicalSafety)

Xaashida Xaqiiqda Maadada Khatarta ah – Isopropyl Alcohol (New Jersey DOH): [www.nj.gov/health/eoh/rtkweb/documents/fs/1076.pdf](http://www.nj.gov/health/eoh/rtkweb/documents/fs/1076.pdf)

Si aad u hesho nuqulka **electarooniga ah** ee Digniintan Khatarta ah, booqo [www.Lni.wa.gov/HazardAlerts](http://www.Lni.wa.gov/HazardAlerts).

Bogga mareegtada Bedqabka L&I:  
[www.Lni.wa.gov/safety-health](http://www.Lni.wa.gov/safety-health).

Si aad u hesho xeerarka kale ee la xiriira, la xiriir xafiiska ee L&I ee degaankaaga ama booqo bogga mareegtada xeerarka bedqabka: [www.Lni.wa.gov/SafetyRules](http://www.Lni.wa.gov/SafetyRules).

Si aad u hesho xafiiska L&I ee kuugu dhow, booqo [www.Lni.wa.gov/Offices](http://www.Lni.wa.gov/Offices).

### Sideen caafimaad uga heli karaa Waaxda Shaqada iyo Warshadaha?

Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ayaa shaqaalaha waxay siisaa la-talin, tababar, iyo gargaar farsamo oo lacag la'aan ah. Maanta wac si aad u jadwaleyso la-talin qarsoodi ah oo lacag la'aan ah ama booqo [www.Lni.wa.gov/SafetyConsultants](http://www.Lni.wa.gov/SafetyConsultants) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waxaad sidoo kale waci kartaa 1-800-423-7233 ama booqo xafiiska L&I ee degaanka ka-dibna weyddii Maareeyaha La-talinta.

*Digniintan waxaa diyaariyay Qaybta Caafimaadka iyo Bedqabka Shaqada (DOSH) ee L&I si loogaga digo loo-shaqeyayaasha, kooxaha shaqada, iyo shaqaalaha khatarraha suuragalka ah ee la xiriira hawlaha shaqada. **Kani ma ahan xeer mana abuurayo waajibbaadyo sharci oo cusub.** Macluumaadka la bixiyay waxaa ka mid ah hagid la soo-jeediyay oo ku saabsan sida looga fogaado khatarraha goobta shaqada wuxuunna qeexayaa xeerarka caafimaadka iyo bedqabka waajibka ah ee ku habboon. DOSH ayaa ku talinaysa in aad sidoo kale ka eegto xeerarka la xiriira shuruudo dheeraad ah.*